

Hagaha Tixraaca Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay dhammaan Dadka Habdhiska Difaaca Jirkooda liito



Dadka habdhiska difaaca jirkooda uu liito waxa ay si gaar ah ugu nugul yihiin caabuqyada oo uu ku jiro COVID-19.

Haddii aad qabto mid kamid ah xaaladaha caafimaad ee soo socda, waxaa lagu aqoonsanayaa qof difaaca jirkiisu uu liito si dhexdhexaad ah ilaa xaalad halis ah waxaana ka faa'iideysan kartaa tallaalka kuuro dheeraad ah oo COVID-19 ah.

Waxaana ka mid ah dadka:

- Qaadnayo daaweynta kansarka firfircoon ee burooyinka ama kansarrada dhiigga
- Isku tallaalay xubin kale oona qaadnayo daawooyin si loogu qasbo in la oggoleysiiyo nidaamka difaaca jirka
- Isku tallaalay unug qof kale 2 dii sano udanbeysay ama qaadnayo daawo si loogu qasbo in la oggoleysiiyo nidaamka difaaca jirka
- Qaba difaaca jirka liita aasaasiga ah ee dhex-dhexaad illaa xaalad halis ah (sida xaaladda DiGeorge, xaaladda Wiskott-Aldrich)
- Qaba caabuq hormarsan ama aan la daaweyn ee HIV
- Helaaya daawo firfircoon oo kuuro/qiyaas sare leh oo ah kuwa yareeya alarjiga ama daawooyinka kale ee laga yaabo inay cadaadiyaan falcelinta difaaca jirka

Liiskan ma wada soo koobayo dhammaan xaaladaha caafimaad ee dadka habdhiska difaaca jirkooda uu liito, fadlan kala hadal dhakhtarkaaga si loo go'aamiyo haddii qaadashada kuurooyin dheeraad ah ay kuu roon yihiin. Haddii habdhiska difaaca jirkaaga uu liito, ka hubi jaantuuska hoose si aad u aragto inta kuuro oo tallaalka ah ee aad uqalanto inaad qaadata si aad isaga ilaaliso COVID-19:

Haddii aad qaadatay...	Dadka horey u qaatay tallaalka COVID-19	Dadka aan horey u qaadatay tallaalka COVID-19
Moderna (6 bilood +)	<p>Miyaad qaadatay hal doos/qiyaas oo hore: Kuurada 2aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4 toddobaad kadib qaadashada dooska/qiyaaska 1aad Kuurada 3aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4 toddobaad kadib qaadashada dooska/qiyaaska 2aad</p> <p>Haddii aad qaadatay laba kuurooyin ama in ka badan: 1 kuuro ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4 toddobaad kadib qaadashada dooska/qiyaastii ugu dambaysay</p> <p>Haddii aad qaadatay saddex kuurooyin ama in ka badan: 1 kuuro ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 8 toddobaad kadib qaadashada dooska/qiyaastii ugu dambaysay</p>	<p>Kuurada 1aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024</p> <p>Kuurada 2aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4 toddobaad kadib kuurada 1aad</p> <p>Kuurada 3aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 4 toddobaad kadib qaadashada dooska/qiyaaska 2aad</p>
Pfizer (6 bilood +)	<p>Miyaad qaadatay hal doos/qiyaas oo hore: Kuurada 2aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 3 toddobaad kadib kuurada 1aad</p> <p>Kuurada 3aad ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024. 8 toddobaad kadib qaadashada kuurada 2aad taas oo loogu talagalay carruurta 6 bilood - 4 sano jirka ah iyo 4 toddobaad oo loogu talagalay dadka da'da kale ah</p> <p>Haddii aad qaadatay laba kuurooyin ama in ka badan: Kuurada tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024. 8 toddobaad kadib qaadashada kuurada 2aad taas oo loogu talagalay carruurta 6 bilood - 4 sano jirka ah iyo 4 toddobaad oo loogu talagalay dadka da'da kale ah</p> <p>Saddex kuurooyin ama in ka badan: Kuurada tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024. 8 toddobaad kadib qaadashada kuuradii ugu dambaysay</p>	<p>Kuurada 1aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024</p> <p>Kuurada 2aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 3-8 ee toddobaad kadib kuurada 1aad</p> <p>Kuurada 3aad: Tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 ugu yeraan 8 toddobaad kadib qaadashada kuurada 2aad taas oo loogu talagalay carruurta 6 bilood ilaa 4 sano jirka ah iyo 4 toddobaad oo loogu talagalay dadka da'da kale ah</p>
Novavax (12 sano jir+)	<p>Hal ama in ka badan oo kuuro oo hore loo qaatay: 1 kuuro/doos ee tallaalka la cusboonaysiiyay 2023-2024 ugu yeraan 8 toddobaad kadib qaadashada kuuradii ugu dambaysay</p>	<p>Kuurada 1aad: Tallaalka La Cusboonaysiiyay</p> <p>Kuurada 2aad: Tallaalka La Cusboonaysiiyay 3 toddobaad kadib kuurada 1aad</p>

SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

Waa maxay xaaladaha caafimaad ee hoose ee halista weyn kuugu galinaya inaad xanuuno daran aad ka qaado caabuqa COVID-19?

Dadka da' kasta jira oo leh xaaladaha hoos ku taxan waxay aad ugu dhow yihiin inay si daran ula xanuunsadaan COVID-19.

Tallaalada COVID-19 (kuurada hore iyo kuwa dheeraadka ah) iyo tallaabooyinka kale ee ka hortagga COVID-19 waa muhiim, gaar ahaan haddii aad da'a wayn tahay ama aad qabto xaalado caafimaad oo badan ama aad u daran oo ay ku jiraan kuwa liiskaan ku jira. Liiskaan kuma jiraan dhammaan xaaladaha suurtagalka ah ee kugu meeleyaayo khatar sare oo xanuun daran oo ka timaada COVID-19. Haddii aad qabto xaalad aan halkaan lagu soo darin, kala hadal bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga sida ugu wanaagsan ee loo maareeyo xaaladaada oo aad naftaada uga ilaaliso COVID-19.

- Kansarka
- Cudurka keliyaha ee muddada-dheer
- Cudurka beerka ee muddada-dheer
- Cudurka sambabaha ee muddada-dheer
- Cudurka dhimirka ama xaaladaha kale ee neerfaha la xariira
- Sonkoroowga (nooca 1 aad ama 2 aad)
- Xanuunka Down syndrome
- Xaaladaha wadnaha
- Caabuqa HIV
- Xaaladda difaaca jirka oo liito (nidaamka difaaca oo daciifay)
- Xaaladaha caafimaadka dhimirka
- Miisaanka xad dhaafka ah iyo buurnida
- Xaamilo
- Xanuunadda ku dhaca unugyada dhiiga cas ama thalassemia
- Sigaar cabista, hadda ama waa hore
- Xubin adag ama unugyada tarma ee dhiiga
- Istorog ama cudurka maskaxda, kaas oo saameeya socodka dhiigga ee maskaxda
- Dhibaatooyinka isticmaalka walxaha
- Qaaxada

Dadka sida dhexdhexaadka ah ama sida daran habdhiska difaaca jirkooda u liito miyey u baahan doonaan qoraalka/qorista dhakhtar ama warqad kale si ay u qaataan garoojooyinkan?

Maya, shakhsiyaadka ayaa is-aqoonsan kara oona kasoo qaadan kara dhammaan garoojooyinka meel kasta oo tallaalada lagu bixiyo. Tani waxay ka caawin doontaa xaqiijinta in aysan jirin caqabado dheeraad ah oo ka hortaagan helitaanka dadyowgaan. Haddii shakhsiyaadka habdhiska difaaca jirkooda uu aadka u liito ay qabaan su'aalo ku saabsan xaaladooda caafimaad ee gaarka ah, waxay kala hadli karaan haddii qaadashada garoojo dheeraad ah ay u habboon tahay ayaga bixiyayaashooda daryeel caafimaadka.

Ma inaan bixiyaa kharashka tallaalka?

Intii lagu jiray cudurka safmareenka ee COVID-19, dawladda federaalka ee Maraykanku waxay iibsatay dhammaan tallaallada COVID-19 waxayna bilaash uga dhigtay qof kasta oo tallaalada doonaya. Hadda maadaama xaaladdii degdega ahayd ee caafimaadka dadweynaha ee COVID-19 ay dhammaatay, tallaallada COVID-19 ayaa la filayaa inay raacaan dariiq la mid ah midka tallaallada kale, taas oo macnaheedu tahay inay soo iibsan doonaan rugaha caafimaadka iyo isbitaallada.

Si la mid ah tallaalada kale, tallaalada COVID-19 waxay u badan tahay inay dabooli doonaan qorshayaasha caymiska badankooda. Tallaalada COVID-19 waxaa weli si lacag la'aan lagu siin doonaa dhammaan carruurta gobolka Washington ilaa ay ka gaarayaan dhalashadooda 19aad iyadoo loo marayo Vaccines for Children Barnaamijka (Barnaamijka Tallaalada Loogu Talagalay Carruurta). Waxaa sidoo kale jira barnaamijyo loogu talagalay dadka waaweyn kuwaas oo gacan ka gaysan kara daboolida kharashka qaadashada tallaalka haddii aanay lahayn caymis caafimaad ama caymiskoodu aanu daboolin tallaalka. Bridge Access Program (Barnaamijka Tallaal Bixinta) wuxuu si ku meelgaar ah tallaallada COVID-19 ee la cusboonaysiiyay 2023-2024 kharash la'aan ku siiya dadka waaweyn ee da'doodu tahay 19 iyo wixii ka weyn ee aan lahayn caymis caafimaad, iyo dadka waaweyn ee caymiskoodu aanu daboolin dhammaan kharashyada COVID-19, wuxuu barnaamijka soconayaa illaa Diseembar 2024. Si aad u hesho goobta farmashiye ka qaybqaadanaya barnaamijkaan, booqo www.vaccines.gov.



Miyaad qabtaa su'aalo dheeraad ah? Booqo: VaccinateWA.org